



## **Warsaxafeed: Hambalyo Talaabo Dhinaca Horumar ah oo loo qaaday dhinaca dimuqraadiyada-**

Anagoo ah, Xarunta dimuqraadiyada iyo maamul wanaaga ee Somaliland (Center for Democracy and Governance) waxaanu fursadan uga faaidaysanyaa in aanu mahadnaq guud u dirno dhamaan danayeyasha dimuqraadiyada Somaliland ee sida wax ku oolka ah uga sheqeyay in heshiis dhamaystiran laga haadho “27<sup>th</sup> February 2020” muranka doorashada ee mudada ina hadhaysay. Taas oo micna ahaan ina tusaysa in taalo wax ku oola hore loo qaaday si loo sii xoojiyo nidaamka dimuqraadiyada Somaliland. Marka ugu horaysa waxaan Mahad gaara u diraynaa gudididi ka koobneyd , culimada, odayada dhaqanka iyo ganacsatada , waxaan si gaara mahadnaq ugu diraynaa beesha caalamka oo uu hor kacaya Ambasador Nicolos Baralenga kaas oo masuuliyad gaara iska saaray sidii khilaafkan loo soo afjari lahaa doorashooyinka paarlamaanka iyo gole deegaana loo soo dooran lahaa sanada 2020 sida heshiiska ay dhinacyadu gaadheen kucad. Marka xigta waxaan u mahadnaqaynaa saddexda xisbi qaran KULMIYE, UCID iyo WADANI oo aqbalay qdobadii ay soo jeediyeen guditia xalinta khilaafaadku kuwaas iyaguna masuuliyad gaara iska saaray sidii doorosho Somaliland uga dhici lahayd sanada 2020.

Marka la eegayo xeerarka dastuurkeena oo ku dhisan doorashooyin dimuqraadya haystana dawlad si dimuqraadiyada ku dhisan kuwaas oo ay is shabahaan wadamo badan oo Africa iyo Bariga dhexeba, hadana Somaliland mudooyinkii ugu dambeeyay waxay la kulmaysay qordoofooyin ku dhacayay hanaanka dimuqraadiyada Somaliland waxaana ugu muhiimsan in laga xuso:

- I. Doorashooyinka madaxtooyada oo tiraba dhawr jeer dub u dhacay.
- II. Parlamaanka Somaliland oo iyaguna mudo 15 sano ah ku fadhiya kuraasta halkii waxti doorashadadoo ay ahayd 5 sano oo kaliya.
- III. Golaha deegaanka oo wakhtigoodu dhamaaday ilaa imikana aan wax goaana laga soo saarin.

Sida heshiika ku xusan, waxaan xaqiisaa in ay jirto kalsooni daro xaga gudida dooroshooyinka ka jirtay taas oo ahayd carqalada ugu weyn ee hortaagneyd in doorasho qabsoonto, waxaana halkaa kusoo korodahay koox dhexdheda loona bixiyay “Technical Election Management ( TEMU), halkaas oo laysla qaataay laguna saxeexay qodobadii ka soo baxay. Xarunta Dimuqraadiyada iyo Maamul wanaaga waxay aragtaa rajo wanaagsan ka dib dhamaadka khilaafaadka. Wuxaanu iftiin xoogan taas oo ah inay inoo dhacdo doorasho lagu wada kalsoon yahay oo ay ka qayb qaadanayaan dhamaan qaybaha kala duwan ee bulshada sida Dumarka , Dhalinyarada, dadka laga tirade badan yahay, dadka aan laxaadkoodu dhameyn iyo waxgaradkuba. Ugu damebeyntii xaruntu waxay soo jeedinaysaa in kalsooni buuxda iyo wadashaqeyn lala sameeyo Gudidaa farsamo ( TEMU) si ay inoogu dhacdo doorosho xor iyo xalaal ahi.

**Gebegob:**

Xarunta dimuqraadiyada iyo maamul wanaagu waxay ku talinaysaa qodobadan soo socda si guul looga gaadho hanaanka dimuqraadiyada Somaliland.

1. In la qabto dooroshooyin wakhtigooda ku dhaca laga fogaado wixii khilaafa ee doorashada dub u dhac ku keenaya.
2. In Kalsoonu buuxda loo muujiyo heshiiskii saddexda xisbi wada galeen iyadoo lala shaqaynayo cida hawsha gacanta ku haya
3. In waxkabadal iyo kaabis lagu sameeyo shuruudaha musharaxiinta paarlamaanka iyo golaha deegaanka si loo helo xildhibaano tayo leh dadka iyo dalkana ugu adeega hufnaan iyo daacad.
4. In la xoojiyo hanaanka dimuqraadiyada xisbiyada dhexdooda oo jaanis la siiyo dhalinyarta aqonta leh inay ku tartamaan hogaanka ugu sareeya ee xisbiyada
5. Saddexda xisbi waa inay la yimaadaan siyaasad cad oo ay ku kasbanayaan shacabka iyagoo ka fogaanaya nidaam qabyaaleeeded.
6. Ugu dambeyn la xisaabtanka xisbiyada iyo shacabka lyana waa mid loo baahan yahay wakhtigan.

Marlabaad iyo mar saddexaad waxaan leenahay hambalyo guusha siyaadeed ee aan dhamaan wada gaadhany

Contact:

**Center for Democracy and Governance**

Main office: Jigjiga yarr, near Safari hotel, Gororiye Building 1<sup>st</sup> floor

Tell” +252-634425849

Email: [country-director@cdgsomaliland.org](mailto:country-director@cdgsomaliland.org)

Web: [www.cdgsomaliland.org](http://www.cdgsomaliland.org)